# Xadidda Aqoonsiyada iyo Lambarkaaga Bulshada

## Miiska ku jira


| | |
|---|---|
| Lambarkaagu waa qarsoodi | 1 |
| Sidee ayaa qof u xadi karaa lambarkaaga? | 2 |
| Waa in aad ka taxadartaa kaarka Lambarka Bulshada iyo kaarka | 2 |
| Maxaad yeeleysaa haddii aad u maleyneyso in qof uu isticmaalayo lambarkaaga | 2 |
| Maxaad yeeleysaa haddii xadista aqoonsiga ay dhibaato ku keento amaah qaadshadaada? | 2 |
| Ma waxa aad codsneysaa Lambarka Bulshada ee cusub? | 3 |
| La Xiriirka Lambarka Bulshada | 4 |


Xaditaanka Aqoonsiyada waa fal dambiyeed aad u so kordhaya dhulka Mareykanka. Qof aan daacad aheyn oo hela Lambarkaga Bulshada waxa uu isticmaali karaa inuu ku helo macluumaad kale oo adiga kugu saabsan. Dadka xada aqoonsiyada waxa lambarkaaga iyo sumcaddaada wanaagsan ee amaahda u isticmaalaan in ay kuc odsadaan deyn dheeraad ah magacaaga. Ka dib, waxa ay isticmaalaan kaararka bangiga mana bixiyaan biilasha, taasoo dhaawaceysa sumcadaada deyn qaadashada.  Waxaa laga yaabaa in aadan ogaan in qof lambarkaaga isticmaalayo ilaa laguu diido amaahda ama ay kula soo xiriiraan deyn bixiyayaal doonaya in aad bixiso alaabatii aad deynta kaga soo qaadatay.

Qof si sharci daro ah u isticmaalaya lambarkaaga waxa uu qiyaasayaa in ay taasi kuu keeni akrto dhibaato fara badan.

## Lambarkaagu waa qarsoodi

Maamulka Lambarka Bulshada waxa uu ilaalinayaa Lambarkaga Bulshada waxayna ka dhigayaan qarsoodi. lambarkaaga cidna ma siineyno, marka laga reebo inta sharcigu kuu ogol yahay. Waa in aad ka taxadartaa cidda aad la wadaageyso lambarkaaga, xitaa marka lagu weydiisto. Waa in aad weydiisaa sababta lambarkaaga loogu baahan yahay, sidoo loo isticmaalayaa maxaase dhacaya haddii aan diido. Jawaabaha su'aalaha waxa ay kaa caawin karaan in sidii aad go'aan uga gaari laheyd in aad bixiso lambarka bulshada iyo in kale.

## Sidee ayaa qof u xadi karaa lambarkaaga?

Dadka xada aqoonsigaaga waxa ayu ku heli karaan macluumaadkaaga iyaga oo:

- Boorsada jeebka, boorsada gacanta, boostada, boostadaada (warqadaha bagiga, deyn laguu ogolaaday, warbixinta bankiga, jeegag cusub iyo macluumaadka canshuurta) oo lagaa xado;
- Xadidtaan laga xado macluumaadka shqsiga ah oo aad ku bixiso bogga internetka oo aan amaan aheyn, diiwanka shaqsiga ah iyo macluumaadka kale ee guriga yaala;
- Fagidda qashinkaaga, qashinka goobaha ganacsiga, iyo qashinka dadaweynaha si loo helo macluumaadka shaqsiga ah;
- Qof telefoon ama iimeyl kuu soo dira oo iska dhiga inuu si sharci ah ugu baahan yahay macluumaad kugu saabsan , oo iska soo dhiga loo shaqeeye ama dadka guryaha kireeya; ama
- Iyaga oo ka iibsada macluumaadka shasiga ah dadka ka shaqeeya «gudaha». Tusaale ahaan, waxaa suurtogal ah in dadka xada aqoonsiyada ay lacag siiyaan shaqaalaha dukaamada aad alaabta deynta kaga codsato oo macluumaadka aad codsiga ku qorto laga helo.

## Waa in aad ka taxadartaa kaarka Lambarka Bulshada iyo kaarka

Marka aad shaqo biloowdo, hubi in aad shaqada aad siiso Lambarkaaga Bulshada si diiwaankaagu sax u noqdo. Sii Lambarkaaga Bulshada hay'adaha maaliyadda si ay canshuurtaada sax u xisaabaan. Kaarkaaga iyo dokumeentiyada kale ee ay ku qoran yihii Lambarkaaga Bulshada meel amaan ah. HA SI JOOGTA AH ha u qaadin kaarka lambarka bulshada iyo waxyaabaha kale ee lambakaaga ku qoran yahay.

## Maxaad yeeleysaa haddii aad u maleyneyso in qof uu isticmaalayo lambarkaaga

Mararka qaarkood hal qof ka badan ayaa isticmaala lambarka bulshada oo isku mid ah, si bareer ah ama aan loo bareerin. Haddii aad tuhunsan tahay in qof kale uu isticmaalayo Lambarkaaga bulshada oo ku shaqeysanayo, waa in degdeg noo soo wargelisaa. Waxaan dib u eegeynaa dakhligaaga si aan u xaqiijino in aan si sax ah u diiwaangelinay.

Waxa kale oo aad ka eegi kartaa dakhliga kuu qoran *Social Security Statement* (*Warbixinta Lambarka Bulshada*). *Warbixinta* waxaa laga heli karaa barta internetka ee dadka shaqeeya oo da'doodu ka weyn tahay 18 jir. Si aad u aragtaada *Warbixinta*, soo booqo barta internetka ee ***www.socialsecurity.gov/myaccount*** oo ka furo xisaab.

## Maxaad yeeleysaa haddii xadista aqoonsiga ay dhibaato ku keento amaah qaadshadaada?

Haddii uu qof si qalad ah u isticmaalo Lambarkaaga Bulshada ama macluumaadkaaga kale si ay amaah ugu qaataan ama dhibaato kale kugu keento, Maamulka Lambarka Bulshada ayaa xalin kara. Laakiin waxaa jira dhawr waxyaabood oo aad saeyn karto.

Soo booqo ***IdentityTheft.gov*** si aad u soo sheegto aqoonsi lagaa xaday una sameysato qorshe aad dib ugu soo kabaneyso. ***IdentityTheft.gov*** ayaa talo kaa siinaya talaabo kasta oo aad qaadeyso si aad uga asoo kabato. Waa meel la siugu keenay caawinaadda aad u baahan tahay oo dawladda dhexe maamusho iyo hay'adda maareynta macaamiisha. Waxa kale oo aad wici kartaa **1-877-IDTHEFT** (**1-877-438-4338**); TTY **1-866-653-4261**.

Waxaa kale oo laga yaabaa in aad la xiriirto Waaxda Adeegga Canshuuraha (IRS). Dadka xada aqoonsiga waxaa kale oo laga yaabaa in ay isticmaalaan Lambarkaaga Bulshada si ay canshuurta u xareeyaan si ay canshuur ucelin u helaan. Haddii ay canshuur ku

*(rogad)*

soo noqneyso, waxa laga yaabaa in qofka aqoonsiga kaa hor xareeyo oo lacagtii isaga loo diro. Ka dib, marka aad xareyso, IRS waxa ay ku xisaabtaneysaa in aad heshay lacagtii laguu soo diray. Haddiii Lambarkaaga Bulshada la xaday, qof kale ayaa u isticmaali kara inuu shaqo ku helo. Dakhliga qofka soo gala waxaa lala socodsiiyaa IRS iyada oo la adeegsanayo Lambarkaaga Bulshada. Taas waxa ay u ekaaneysaa in aadan soo sheegin dhamaan dakhliga ku soo gala ee canshuurtaada lagu soo gudbin lahaa. Haddii ay jirto arrin la xiriirta canshuuraha oo aad is leedahay qof kale ayaa isticmaalaya aqoonsigaaga, soo booqo ***www.irs.gov/uac/Identity-Protection*** ama la soo xiriir **1-800-908-4490**.

Waxaa sidoo kale lagaa doonayaa in aad cabashadaada gaarsiiso Xarunta Dacwadaha Fal Dambiyeedka Internetka (IC3) ee ***www.ic3.gov***.

IC3 waxa ay dhibanayaasha siisaa talo iyo sida ugu haboon ee diginiin loo gaarsiiyo hay'adaha dawladda ee dadka lagu tuhunsan yahay ama jabiya sharciyada madaniga ah. IC3 waxa ay cabashadaada gaarsiisaa hay'adaha dwladda ee degaankaaga ama kuwa sharci dajinta ee halka ad degan tahay.

IC3 waxa ay u xilsaaran tahay qabashada, ururinta, iyo cabashooyinka fal dambiyeedka ee la xiriira fal dambiyeedka kombiyuutarada ee isa soo taraya. IC3 waxa ay u adeegtaa hay'adaha sharci fulinta oo dhan sidii ay ula dagaalami lahaayeen fal dambiyeedka internetka. Kuwaas waxaa ka mid ah kuw dawladda dhexe, gobol, degaal iyo kuwa caalamiga ah.

IC3 waxa ay u taagan tahay xiriir wada shaqeyn ah oo u dhaxeeya Hay'adda Dawladda Dhexe ee Dambi Baarista (FBI), Xarunta Qaranka ee Fal dambiyeedka Qalinka wax lagu xado iyo Xafiiiska Sugitaanka Cadaaladda.

Waa in aad la socotaa warbixinta sida amaah laguugu ogolaan karo markii muddo la joogaba. Warbixintaas oo lacag la'aan ah waxa aad ke heli kartaa ***www.annualcreditreport.com***.

## Ma waxa aad codsneysaa Lambarka Bulshada ee cusub?

Haddii aad sameysay wax walba oo aad sameyn kartid si aad u xaliso dhibaatada ka dhalatay qalad u isticmaalka Lambarkaaga Bulshada oo qofkii uu weli isticmaalayo, waxaan laguu sameyn kara lambar cusub.

Ma lagu siinayo Lambarka Bulshada oo cusub:

- Haddii Lambarkaaga Bulshada lagaa xaday ama lumay, laakiin aanay jirin caddeyn muujineysa in qof kale isticmaalayo.
- Si aad uga baxsato natiijada ka dhalan karta markii aad diiwaan gelisay in aad falistay;
- Haddii ay ujeedadaadu tahay in aad ka baxsato iyo mas'uuliyad ku saaran; ama

Haddii aad go'aan ku gaarto in aad codsato lambar cusub, waxaa lagaa doonayaa in aad caddeyso aqoonsigaaga, da'daada, sharciga aad wadanka ku joogto iyo aqoonsigaaga. Macluumaad dheeraad ah waxa aad ka heli for *Your Social Security Number and Card* (Publication Number 05-10002). Waxaa kale oo lagaa doonayaa in aad keento caddeyn muujineysa in aad dhibaato joogta ah kala kulanto lambarkaaga oo la isticmaalo.

Waa in aad maanka ku heysaa lambarka cusub aanu xalineyn dhamaan dhibaatooyinkaaga. Taas waxaa ugu wacan hay'adaha kale e dawladda (sida IRS iyo waaxda gaadiidka gobolka) iyo ganacsiga gaarka ah (sida bangiyada iyo shirkadaha amaahda) oo lambarkaagii hore weli ku heysta diiwaanka. Iyaga oo eegaya macluumaadkaaga kale, hay'adaha amaahdu waxa ay isticmaalaan lambarkaaga si ay eegan diiwaankaaga amaahda. Sidaa darteed lambarkaaga cusub ma balan qaadayo bilow cusub. Tani waa dhab haddii macluumaadkaaga kale, sida magacaaga iyo cinwankaaga, aanay is bedelin.

Haddii laguu soo diro lambar cusub, ma isticmaali kartid lambarkaagii hore.

Dadka dhibaatadu ka soo gaarto xadidda aqoonsiyada, lambar cusub oo loo sameeyo waxa uu ku abuuraa dhibaato cusub. Haddii aan macluumaadkii hore ee amaahda aan lagu

*(rogad)*

lifaaqin lambarka cusub, mar haddii aan la ehyn taariikhda amaahda iyo sida deynta u bixiso waxaa kugu adkaanaya in aad deyn cusub qaadan karto ama muujin karto in sumcadaadu wanaagsan tahay.

## La Xiriirka Lambarka Bulshada

Waxaa jira dhawr hab oo loola xiriiri karo Lambarka Bulshada, oo ay ka mid tahay barta internetka, telefoonka iyo in aad tagto xafiiska. Halkan waxa aan u joognaa in aan ka jawaabno su'aalahaaga oo aan kuu adeegno. In ka badan, Lambarka Bulshada waxa ay caawiyeen si ay maanta iyo mustaqbalka ugu guuleystaan iyagoo u fidiyey gargaar dhaqaale malaayiin dad ah oo halgan ugu jira nolosha.

### Booqo bartayada internetka

Sida ugu haboon ee meel kasta loogala soo xiriiro kaaro Lambarka Bulshada waa adiga oo soo booqda ***www.socialsecurity.gov***. Halkaas oo aad:

- Ka sameysan *my* Social Security xisaab oo aad kala socoto *Social Security Statement* (*Warbixinta Lambarka Bulshada*), ka hubiso lacagta aad shaqeysay, aad ka daabacan karto warqada xaqiijinta macaashka, ka bedeli karto lacagta bangiga laguugu shubo, aad ka daabacan karto foomka SSA-1099/1042S iyo kuwo kale;
- Ka codsan karto caawinaad dheeraad ah (Extra Help) ee ku saabsan daawada laguu qoro ee ceymiska caafimaadka ee Medicare;
- Waxa aad ka coddsan kartaa hawlgabka, naafada, iyo macaashka Medicare;
- Aad ka hesho nuqul ka mid ah daabacaadaha aan soo saarno;
- Aad ka hesho jawaabaha su'aalaha markasta la is weydiiyo; iyo
- Iyo kuwo kale oo dheeraad ah!

Adeegyada qaarkood waxa aad ku heli kartaa afka Ingiriisiga oo kaliya. Soo booqo barta Luqadaha kala duwan oo aad macluumaadka ku heli karto Af Soomaali. Waxaanu idiin heli karnaa tarjubaano lacag la'aan ah oo idinka caawin kara waxyaabaha aad uga baahan tihiin Xafiisyada Lambarkaaga Bulshada Waxa aan kuu heli karnaa tarjubaan haddii aad na soo wacdaan ama aad soo booqataan Xafiiska Lambarka Bulshada.

### Nagala soo xiriir

Haddii aadan heli karin internetka, waxaa jirta adeegyo dhameystiran oo aad telefoonka ku heli karto, 24ka saac, 7da cisho ee todobaadka. Nagala soo xiriir telefoonka lacag la'aanta ah ee **1-800-772-1213** ama numberka TTY, **1-800-325-0778**, haddii aad dhagaha la' dahay ama maqalku kugu adag yahay.

Haddii aad dooneyso in qof aad la hadasho, waxa aan telefoonka ka jawaabnaa inta u dhaxeysa 7da aroornimo ilaa 7da fiidnimo Isniinta ilaa Jimcaha. Waxaanu ku weydiisaneynaa in aad dulqaadato mudada aan mashquulsanahay oo telefoonadu badan yihiin ama aad mudo dheer khadka ku jirto. Waxaanu rajeyneynaa on aan kuu adeegno.

Securing today
and tomorrow

**Social Security Administration**
Publication No. 05-10064-SO | June 2017
Xadidda Aqoonsiyada iyo Lambarkaaga Bulshada
Identity Theft and Your Social Security Number (Somali)
Produced and published at U.S. taxpayer expense
Waxaa lagu soo saaray oo lagu daabacay lacagta canshuur bixiyayaasha